# Dib Ugu Noqoshada Xaq U Yeelashada Caawinaad Dheeraad ah ee Ceymiska Daawada ee Medicare: Waxyaabo Ay Waajib Kugu Tahay In Aad Ogaato

## Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Goorma ayey Lambarka Bulshadu sameynayaan dib ugu noqoshada? | 1 |
| Sidee ayaa Lambarka Bulshadu iila soo xiriirayaa? | 1 |
| Maxaan yeelayaa haddii aan doonayo in la iga caawiyo buuxinta foomkan? | 2 |
| Waa maxay isbedelka lagu sameynayo Caawinadda Dheeraadka ah? | 2 |
| Maxaa dhacaya haddii aanan soo celin foomka dib u eegidda? | 2 |
| Sidee ayaan ku ogaanayaa go'aanka ay Lambarka Bulshadu ka gaareen Dib U Eegista? | 2 |
| Sidee ku heli karaa macluumaad dheeraad ah? | 2 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 2 |


Haddii lagu siiyo Caawinaad Dheeraad Ah ee kharashka ceymiska daawada ee Medicare, waxaa suurogal in Lambarka Bulshadu ay kula soo xiriiraan markii muddo la joogaba si ay u eegaan xaaladaada. Dib ugu noqoshadaasi waxaa lagu xaqiijinayaa in aad weli xaq u leedahay Caawinaa Dheeraad ah oo lagu siiyo macaashka aad xaqa u leedahay.

Haddii laguu doorto in dib loo eego, wax is bedel ah kuma dhacayo Caawinaada Dheeraadka ee lagu siiyo.

## Goorma ayey Lambarka Bulshadu sameynayaan dib ugu noqoshada?

Dib ugu noqoshada waxa la sameynayaa sanad kasta, inta badan dhamaadka sanadka.

## Sidee ayaa Lambarka Bulshadu iila soo xiriirayaa?

Waxa aan kuu soo direynaa foom aad buuxineyso oo lagu magacaabo Social Security Administration Review of Your Eligibility for Extra Help (SSA-1026) (Dib U eegista Xaq U Yeelashada Caawinaad Dheeraad ah. Waxa aad heysataa muddo 30 cisho oo aad ku buuxiso foomka oo aad ku soo celiso. Isbedelka muhimka ah ee lagu sameeyo Caawinaadda Dheeraadka Ah waxa ay dhaqan geleysaa Janaayo sanadka soo socda. Tusaale ahaan, haddii laguu soo diro dib u eegis Agoosto 2015 oo aad ku soo celiso 30 cisho gudahood, isbedelka muhimka ah ee lagu sameeyo Caawinaadda Dheeraadka ah waxa ay dhaqan geleysaa Janaayo 2016.

## Maxaan yeelayaa haddii aan doonayo in la iga caawiyo buuxinta foomkan?

Xubnaha qoyska, daryeelayaasha iyo iyo qofkii kale ayaa kaa caawin kara buuxinta foomka. Lambarka Bulshadu sidoo kale waxa ay kugu caawin karaan in ay kaaga jawaabaan su'aalaha. Naga soo wac **1-800-772-1213**. Haddii aad dhagaha jigto, waxa aad wici kartaa lambarka TTY, **1-800-325-0778**. Waxaad soo booqan kartaa Xafiiska Lambarka Bulshada ee degaanka si laguu caawiyo.

## Waa maxay isbedelka lagu sameynayo Caawinadda Dheeraadka ah?

Mid ka mid ah kuwa soo socda:

- In aan waxba laga bedelin Caawinaadda Dheeraadka ee lagu siiyo;
- In la kordhiyo Caawinaadda Dheeraadka ee lagu siiyo;
- In la yareeyo Caawinaadda Dheeraadka ee lagu siiyo; ama
- In la joojiyo Caawinaadda Dheeraadka.

## Maxaa dhacaya haddii aanan soo celin foomka dib u eegidda?

Caawinaadda Dheeraadka ee lagu siiyo waa la joojinayaa.

## Sidee ayaan ku ogaanayaa go'aanka ay Lambarka Bulshadu ka gaareen Dib U Eegista?

Lambarka Bulshada waxa ay kuu soo dirayaan waraaq ay kuugu sharxayaan go'aanka aan gaarnay Haddii aad aaminsan tahay in go'aanku aanu sax aheyn, xaq waxa aad u leedahay in aad racfaan ka qaadato. Waraaqda ayaa laguugu sharxayaa sida racfaan looga qaato.

## Sidee ku heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Caawinadda Dheeraadka Ah ee ceymiska daawada ee Medicare, ama macluumaad guud oo ku saabsan Lambarka Bulshada, soo booqo ***www.socialsecurity.gov*** ama la xiriir Lambarka Bulshada ee **1-800-772-1213** (TTY 1-800-325-0778). Haddii aad na soo wacdo adiga oo su'aal ka qaba waraaq aan kuu soo dirnay, fadlan warqadda horey u soo qaado. Waxa ay naga caawineysaa in aan kaaga jawaabno su'aalahaaga.

Macluumaad dheeraad oo ku saabsan xilliga isdiiwaangelinta, soo booqo www.medicare.gov ama ka soo wac **1-800-MEDICARE** (**1-800-633-4227**; TTY **1-877-486-2048)**.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;

- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

## Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



**Social Security Administration**
Publication No. 05-10111-SO | July2017
Dib Ugu Noqoshada Xaq U Yeelashada Caawinaad Dheeraad ah ee Ceymiska Daawada ee Medicare: Waxyaabo Ay Waajib Kugu Tahay In Aad Ogaato
Review Of Your Eligibility For Extra Help With Medicare Prescription Drug Plan Costs: Some Things You Should Know (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha